DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 22^AAD | CADADKA 12^AAD | TAARIIKH: 31/12/22 | Lam. 01 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA KHAYRAADKA BIYAHA PUNTLAND

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Khayraadka Biyaha Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**Sharci Lr. 01 ee 30-ka December 2022, kuna saabsan Sharciga Khayraadka Biyaha Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad farqadiisa 16-aad iyo Qodobka 64-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/83/2022, kuna taariikhaysan 18-ka December 2022.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Sharcigani u leeyahay Khayraadka Biyaha Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Khayraadka Biyaha Puntland

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/83/2022** **Garoowe, Khamiis** **Taariikh: - 08/12/2022**

Ku:- **Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

Ujeeddo:-**ANSIXINTA XEERKA KHAYRAADKA BIYAHA PUNTLAND**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobadiisa 64-aad iyo 68-aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo jeedinta Guddiga Dhowrista Deegaanka iyo Khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiillada ee ku saabsanayd hindise xeereedka Khayraadka Biyaha Puntland

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay samaynta Xeerarka Khayraadka Biyaha Puntland.

**MARKUU ARKAY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 51-aad fadhigiisii 11-aad ee 14.11.2022 ku Ansixiyey Xeerka Khayraadka Biyaha Puntland, Guntanka Fadhiguna ahaa **(38)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol **(38)** Mudane, diidmo majirin, cid ka aamustayna ma jirin.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Khayraadka Biyaha Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# XEERKA KHAYRAADKA BIYAHA PUNTLAND

**DISEEMBAR, 2022**

**GAROOWE, PUNTLAND, SOOMAALIYA**

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Tusmada

Bogga

QODOBO HOR-DHAC AH ..... 1
Qodobka 1-aad ..... 1
Erey Bixin ..... 1
Qodobka 2-aad ..... 3
Magaca Xeerka ..... 3
Qodobka 3-aad ..... 3
Baaxadda Xeerka ..... 3
Qodobka 4-aad ..... 3
Ujeeddooyinka Xeerka ..... 3
Qodobka 5-aad ..... 4
Mabaadi'da Xeerka ..... 4
CUTUBKA 2-AAD ..... 4
AWOODAHA HAY'ADAHA ..... 4
Qodobka 6-aad ..... 4
Awoodaha iyo Waajibaadka Wasaaradda ..... 4
Qodobka 7-aad ..... 5
Awoodaha iyo Waajibaadka Wakaaladda ..... 5
Qodobka 8-aad ..... 6
Awoodaha Maamulka Degmada ..... 6
Qodobka 9-aad ..... 7
Wada-shaqaynta Hay'adaha Horumarinta ..... 7
Kaabeyaasha Biyaha ..... 7
CUTUBKA 3-aad ..... 7
XUQUUQAHA ADEEGSIGA KHAYRAADKA BIYAHA ..... 7
Qodobka 10-aad ..... 7
Xaqa Muwaadinka ee Biyaha ..... 7
Qodobka 11-aad ..... 7
Dammaanad-qaadka Xuquuqda Biyaha ..... 7
CUTUBKA 4-AAD ..... 8



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

DIIWAAN-GELINTA IYO RUQSADAHA .......... 8
Qodobka 12 -aad .......... 8
Ruqsadaha Biyo soo saarka .......... 8
CUTUIBKA 5-aad .......... 9
KHIDMADAHA .......... 9
Qodobka 13-aad .......... 9
Khidmadda Kiraynta .......... 9
Qodobka 14-aad .......... 9
Khidmadda Soo-saarka .......... 9
Qodobka 15-aad .......... 9
Canshuurta Iibka .......... 9
Qodobka 16-aad .......... 10
Lacag-bixinta Gaarka ah .......... 10
CUTUBKA 6-aad .......... 10
LAHAANSHAHA IYO MAAMULKA HANTIDA MA GUURTADA .......... 10
Qodobka 17-aad .......... 10
Lahaanshaha Biyaha Dabiiciga ah iyo Agabka .......... 10
Qodobka 18-aad .......... 10
Maamulka Hantida Ma-guurtada ah ee Biyaha .......... 10
Qodobka 19-aad .......... 10
Dib-ula-noqoshada Maamulka Biyaha .......... 10
Qodobka 20-aad .......... 11
Maamulka Agab-biyoodka .......... 11
CUTUBKA 7-aad .......... 11
MAALGASHIGA KHAYRAADKA BIYAHA .......... 11
Qodobka 21-aad .......... 11
Maalgashiga Dawladda Dhexe ee Kaabeyaasha Biyaha .......... 11
Qodobka 22-aad .......... 11
Maalgashiga Degmooyinka ee Kaabeyaasha Biyaha .......... 11
Qodobka 23-aad .......... 11
Maalgashiga Ganacsatada ee Kaabeyaasha Biyaha Cusub .......... 11
Qodobka 24-aad .......... 12
Maalgelinta Ganacsatada ee Kaabeyaal Biyood oo Jiray .......... 12



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 8-aad ..... 12
BIYO-SIINTA MAGAALOOYINKA ..... 12
Qodobka 25-aad ..... 12
Mas'uuliyadda Biyo-siinta Magaalooyinka ..... 12
Qodobka 26-aad ..... 13
Hawl-galka Biyo-siinta Magaalooyinka ..... 13
Qodobka 27-aad ..... 14
Qorshaha Cusboonaysiinta Kaabeyaasha Biyaha ..... 14
CUTUBKA 9-aad ..... 14
BIYO-SIINTA DEEGAANNADA MIYIGA ..... 14
Qodobka 28-aad ..... 14
Maareynta Kaabeyaasha Biyaha Deegaannada Miyiga ..... 14
Qodobka 29-ad ..... 15
Maareynta Kaabeyaasha Biyaha Miyiga ee Adeeg-bixiye Gaar ah ..... 15
Qodobka 30-aad ..... 15
Maareynta Degmada ee Kaabeyaasha Biyaha Miyiga ..... 15
Qodobka 31-aad ..... 15
Kaabeyaasha Biyaha Miyiga ee Gaarka loo Leeyahay ..... 15
CUTUBKA 10-aad ..... 15
WARAABINTA XOOLAHA ..... 15
Qodobka 32-aad ..... 15
Baro-biyoodka Miyiga ..... 15
Qodobka 33-aad ..... 16
Xuquuqda Xoolaha ee Baro-biyoodka Miyiga ..... 16
Qodobka 34-aad ..... 16
Qorsheynta iyo Nidaaminta Baro-biyoodka Xoolaha ..... 16
Qodobka 35-aad ..... 16
Ilaalinta Deegaanka Baro-biyoodka Miyiga ..... 16
CUTUBKA 11-aad ..... 16
BIYAHA WARAABKA ..... 16
Qodobka 36-aad ..... 16
Xuquuqda Biyaha Waraabka ..... 16
Qodobka 37-aad ..... 16



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Mudnaanta ka Faa'iidaysiga Biyaha ........ 16
Qodobka 38-aad ........ 17
Maareynta Baro-biyoodka Waraabka ........ 17
CUTUBKA 12-aad ........ 17
ILAALINTA FAYO-DHAWRKA IYO TAYADA BIYAHA ........ 17
Qodobka 39-aad ........ 17
Mas'uuliyadda Guud ee Ilaalinta Tayada Biyaha ........ 17
Qodobka 40-aad ........ 17
Mas'uuliyadaha Degmada ee Ilaalinta Tayada Biyaha ........ 17
Qodobka 41-aad ........ 18
Mas'uuliyadaha Adeeg-bixiyaha ee Ilaalinta Tayada Biyaha ........ 18
CUTUBKA 13-aad ........ 18
ILAALINTA BIYAHA HOOSE ........ 18
Qodobka 42-aad ........ 18
Sahanka Biyaha Dhulka Hoose ........ 18
Qodobka 43-aad ........ 18
Baraxa iyo Kordhinta Biyo-Duleedka ........ 18
Qodobka 44-aad ........ 18
Ilaalinta Dhulka Ceelasha Biri-qoddayga ah ........ 18
Qodobka 45-aad ........ 19
Ceel-qodista ........ 19
Qodobka 46-aad ........ 19
Kormeerka iyo Qiimaynta Biyaha ........ 19
Qodobka 47-aad ........ 19
Ilaalinta Dhulka Biyo-qabatinka ah ........ 19
CUTUBKA 14-aad ........ 19
ILAALINTA BIYO-DULEEDKA ........ 19
Qodobka 48-aad ........ 19
Isticmaalka iyo Xadeynta Biyo-duleedka ........ 19
Qodobka 49-aad ........ 20
Hawlaha Horumarinta Biyo-Duleedka ........ 20
Qodobka 50-aad ........ 20
Isticmaalka Biyo-duleedka Keydsan ........ 20



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Qodobka 51-aad** ..... 21
**Xaqa Isticmaalayaasha Deggan Biyo-shubka Hoose** ..... 21
**Qodobka 52-aad** ..... 21
**Baraxa Biyo-duleedka** ..... 21
**Qodobka 53-aad** ..... 22
**Ku darka Walxaha Adag** ..... 22
**Qodobka 54-aad** ..... 22
**Qodaalka Gudaha Biyo-mareenka** ..... 22
**CUTUBKA 15-aad** ..... 22
**XUQUUQAHA LA XIRIIRA BIYAHA IYO** ..... 22
**LAHAANSHAHA DHULKA** ..... 22
**Qodobka 55-aad** ..... 22
**Xiriirka Lahaanshaha Dhulka iyo Biyaha** ..... 22
**Qodobka 56-aad** ..... 22
**Ilaalinta Dhulka Aagga Baraha Biyaha iyo Xuquuqda Gelidda** ..... 22
**Qodobka 57-aad** ..... 23
**Magdhawga Dhul Laga Hirgeliyey Agab-biyood** ..... 23
**CUTUBKA 16-aad** ..... 23
**QODOBO GUUD** ..... 23
**Qodobka 58-aad** ..... 23
**Awoodda Gelitaanka, Baaritaanka iyo Qaadista Muunado** ..... 23
**Qodobka 59-aad** ..... 24
**Gurmadka Abaaraha Iyo Daadadka** ..... 24
**Qodobka 60-aad** ..... 24
**Ilaalinta Deegaanka** ..... 24
**Qodobka 61-aad** ..... 24
**Magdhaw** ..... 24
**Qodobka 62-aad** ..... 25
**Xallinta Khilaafaadka Ka Dhasha Isticmaalka** ..... 25
**Iyo Maareynta Biyaha** ..... 25
**Qodobka 63-aad** ..... 25
**Ciqaabaha** ..... 25
**Qodobka 64-aad** ..... 25



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Ururrada Isticmaalayaasha Biyaha .......... 25
Qodobka 65-aad .......... 26
Fayo-dhawrka Kaabeyaasha Biyaha iyo Bullaacadaha .......... 26
Qodobka 66-aad .......... 26
Xeer-nidaamiye .......... 26
Qodobka 67-aad .......... 26
Burin .......... 26
Qodobka 68-aad .......... 26
Dhaqan-galka .......... 26

## CUTUBKA 1-aad
## QODOBO HOR-DHAC AH
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan ereyadan si kale loo macneyn, waxay yeelanayaan erey bixinta soo socota;-

| Lr | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Khayraadka Biyaha Dawladda Puntland. |
| 2. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 3. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 4. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Tamarta, Macdanta iyo Biyaha Dawladda Puntland. |
| 5. | **Wakaalad** | Waxaa loola jeedaa Wakaaladda Horumarinta Biyaha ee Dawladda Puntland. |
| 6. | **Degaannada Magaalooyinka** | Waxaa loola jeedaa dhulalka iyo soohdimaha degmooyinka darajada (A) ee Gobollada iyo Degmooyinka sida ku cad Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Golayaasha Deegaanka ee Dawladda Puntland. |
| 7. | **Degaannada Miyiga** | Waxaa loola jeedaa dhulka ka baxsan magaalooyinka ee ay ku nool yihiin xoolo-dhaqatadu ee baadiyaha ah. |
| 8. A | **Khidmadda Soo-saarka Biyaha** | Waa qiimaha uu shakhsi ama shirkad bixiyo/bixiso oo la siiyo hay'ad qaabilsan soo saarka biyaha si ay u soo saaraan biyo dabiici ah. |
| 9. | **Ruqsadda lsticmaalka Biyaha** | Waa oggolaansho qoraal ah oo ay bixiso Wakaaladdu, kaasoo u fasaxaya shakhsiga/shirkadda la siiyey xuquuqda soo saarka iyo isticmaalka biyaha. |
| 10. | **Balli** | Waa War ama Biyo-qabad dhulka dushiisa ah oo ururiya, isla markaana keydiya biyaha daadka ah oo ay ku jiraan biyaha dhibicda roobka. Balliyadu waxa ay noqon karaan kuwa gaar loo leeyahay iyo kuwa guud. |
| 11. | **Berked** | Waa haro hoos u qodan oo sida badan sibdhan si ay u qabato, una keydiso biyaha daadka ah iyo kuwa dhibicda roobka. Berkeduhu waxa ay noqon karaan kuwa gaar loo leeyahay iyo kuwa guud. |
| 12. | **Ceel** | Waa bar-biyood gacan ama riig lagu qoday. |
| 13. | **Biya-badeed** | Waa biyaha badda laga bilaabo caariga ilaa badweynta oo aanay ku jirin laasaska xeebta laga qoto. |
| 14. | **Biya-siinta Maxalliga ah** | Waxaa loola jeedaa haqabtirka biyaha guryaha dadku degan yahay. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| 15. | **Biya-dhuleed** | Waxaa loola jeedaa biyaha dabiiciga ah ee ku keydsan ama soconaya dhulka hoostiisa ama biyo keydka ku teedsan dhul-xeebeedka. |
| 16. | **Biyaha isku-dhafan** | Waxaa loola jeedaa biyaha ka soo noqda beeraha, bullaacadaha, biyaha wasakhdaha ee Wershadaha iyo wixii la mid ah. |
| 17. | **Mulkiilaha Xuquuqda Isticmaalka Biyaha** | Waa hay'ad dawladeed ama shirkad gaar loo leeyahay oo u-xilsaaran arrimaha maamulka biyaha ama Wakaaladdu u wakiilatey xaqa isticmaalka agab ama nidaam biyood ee dawladeed. |
| 18. | **Barax** | Waxaa loola jeedaa in si ku talagal ah ama kama' ah loogu daro dareere ama adke biyaha fadhiya dhulka dushiisa ama hoostiisa, ku daristaasi ha keento wasakheyn ama yey keenin. |
| 19. | **Halbeegyo** | Waxaa loola jeedaa heerka taya ahaan loo asteeyey badeecadaha ama adeegyada, kuwaasoo ay khasab tahay in la gaaro si loogu oggolaado isticmaal dadweyne, waxaana ka mid ah halbeega Tayada Biyaha. |
| 20. | **Shakhsi** | Waxaa loola jeedaa cid leh shakhsiyad qaanuuni ah oo noqon karta qof dabiici ah (Natural Person) ama qof aan dabiici ahayn (Artificial Person) sida shirkad ama ururro samafal, kuwaasoo daneeya horumarinta iyo maareynta biyaha. |
| 21. | **Wasakhayn** | Waxaa loola jeedaa isbeddel kasta oo ku yimaada xaaladda ama hoos u dhiga tayada biyaha ee ku qeexan qodobada Xeerkan. |
| 22. | **Biya-duleed** | Waxaa loola jeeda biyaha si joogto ah ama marar kala durugsan socda ama fariista dhulka dushiisa, kuwaasoo ka soo hara roobka, waxaana ka mid ah dur-durrada iyo balliyada. |
| 23. | **Unuga Maamulka Biyaha** | Waxaa loola jeedaa Shaqaale ama guddi loo xilsaarey maamulka agab-biyoodka iyagoo wakiil ka ah Wakaaladda ama Dawladda Hoose. |
| 24. | **Adeeg-bixiye** | Waxaa loola jeedaa shakhsiga/shirkad bixiya adeeg biyood isagoo ku beddelanaya lacag. |
| 25. | **Khayraadka Biyaha** | Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ah biya-dhuleed ama biyo-duleed. |
| 26. | **Xaqa isticmaalka biyaha** | Waxaa loola jeedaa xaqa isticmaalka biyo baaxad cayiman leh oo laga qaadanayo Goob biyood cayiman. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan Waxaa lagu magacaabaa Xeerka Khayraadka Biyaha Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Maamulka iyo Maareynta Khayraadka Biyaha Deegaannada Puntland oo dhan.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa;-

1. Kor u qaadidda maareynta wanaagsan, adeegsiga farsamooyin iyo halbeegyo ku habboon baaritaanka, isticmaalka, ilaalinta iyo fayo-dhowrka khayraadka biyaha, si loo sugo dammaanad-qaadka xuquuqda muwaadinka.
2. Xoojinta isu-duwidda iyo isku xirka dhammaan shaqooyinka hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka ah ee la xiriira tayada, tirada, qaybinta, isticmaalka iyo maamulka ilaha biyaha.
3. Xaqiijinta in dadweynaha Puntland helaan biyo nadiif ah, sugan oo ugu filan adeegyada aasaasiga ah iyo horumarinta dhaqan-dhaqaale.
4. Samaynta sicir-goynta biyaha iyo hirgelinta khidmadda isticmaalayaasha nidaamka biyo-gelinta, si loo dhiirrigeliyo tashiilka biyaha oo leh qiime dhaqan-dhaqaale, balse ah khayraad xaddidan oo mar uun dawri kara.
5. Habaynta isticmaalka khayraadka biyaha, si loo horumariyo waraabka beeraha iyo xoolaha, shaqada wershadaha, macdan qodista, dhalinta tamarta korontada, kalluumaysiga, ilaalinta deegaanka iyo soo jiidashada dalxiisayaasha.
6. Xakamaynta dikhowga deegaanka ilaha biyaha, si looga hor tago waxyeellada caafimaadka dadka, xoolaha iyo noolaha kaleba.
7. Aqoonsiga iyo xoojinta Xeer-dhaqameedka Puntland ee la xiriira maamulka iyo maareynta khayraadka biyaha.
8. Hirgelinta habka wadaagga dawladda iyo shirkadaha gaarka ah (Public Private Partnership) si loo xoojiyo tayada adeeg-bixinta biyaha magaalooyinka Puntland, lana dhiirri-geliyo lahaanshaha wada-jirka ah ee dawladda iyo dadweynahaba.
9. Qeexista waajibaadka wada-shaqeynta iyo iskaashiga u dhexeeya hay'adaha dawladda iyo shirkadaha gaarka ah ee ka shaqeeya biyaha.



XARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUN... STATE GENERAL SOLICIT...

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Xeerka

Xeerkan wuxuu ku dhisan yahay Mabadi'dan hoos ku taxan:

1. Ka faa'iidaysiga khayraadka biyaha si waafaqsan qodobka 54-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. U sinnaanta ka faa'iidaysiga adeegga khayraadka biyaha faquuq la'aan si waafaqsan qodobka 12-aad ee Dastuurka.
3. Ilaalinta khayraadka biyaha oo kamid ah khayraadka dalka iyo dammaanad-qaadka in cid walba si Xeerka waafaqsan oo joogtaysan uga faa'iidaysato, si loo xaqiijiyo gaarista ujeeddooyinka qodobka 50-aad faqradiisa 2-aad ee Dastuurka.
4. Ilaalinta fayo-dhawrka iyo bed-qabka deegaan-biyoodka si waafaqsan qodobka 55-aad ee Dastuurka iyo Xeerka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka Puntland.
5. Dhiirrigelinta maalgelinta waddaniga ah ee kaabeyaasha khayraadka biyaha, si loo helo horumar dhaqaale oo joogtaysan sida uu qabo qodobka 50-aad ee Dastuurka Puntland.

# CUTUBKA 2-AAD
# AWOODAHA HAY'ADAHA

## Qodobka 6-aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Wasaaradda

Wasaaraddu waxay u-xil-saaran tahay:-

1. Isu-duwidda guud ee la xiriirta maareynta iyo adeegsiga khayraadka biyaha si waafaqsan Xeerkan.
2. Hoggaaminta Cilmi-baaris la xiriirta horumarinta khayraadka biyaha.
3. Dejinta iyo dib-u-eegidda siyaasadaha iyo qorsheyaasha istaraatiijiga ah ee la xiriira biyaha, si waafaqsan xeerkan.
4. Soo saarista xeer-nidaamiyeyaal iyo habraacyo kaabaya fasiraadda iyo dhaqan-gelinta Xeerkan.
5. U qareemidda maalgelinta lagu horumarinayo baahinta adeegga biyaha, iyadoo lala kaashanayo hantiilayaasha waddaniga ah, Dawladda Federaalka iyo deeq bixiyayaasha shisheeye.
6. Kormeeridda iyo la socodka shaqada Wakaaladda iyo guud ahaan cid kasta oo si toos ah ama dadban ugu hawlan horumarinta iyo maareynta biyaha Puntland.
7. Tayeynta iyo kor u qaadidda aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha ka shaqeeya hay'adaha adeegga khayraadka biyaha.
8. Sare u qaadidda wacyiga iyo aqoonta dadweynaha ee ka faa'iidaysiga khayraadka kala duwan ee biyaha.

9. Dejinta iyo horumarinta heer-beegyada tayada biyaha la cabbo oo ay ka mid yihiin biyaha warshadaysan, dib u eegsita biyaha isku-dhafan iyo sidii loo badbaadin lahaa loogana faa'iidaysan lahaa biyo-hayaha, biyaha oogada, xeebaha iyo badaha.
10. Ilaalinta iyo diiwaan-gelinta hantida guurtada ah iyo midda ma guurtada ah iyo mas'uuliyadda guud ee arrimaha biyaha Puntland.
11. Dejinta habraacyada bixinta ruqsadaha biyaha iyo la socodka heshiisyada.
12. Xoojinta awoodda Dawladaha Hoose si ay u hantaan mustaqbalka maareynta iyo kormeerka adeegyada biyaha ka jira degmooyinkooda.
13. Gudashada hawlaha iyo waajibaadka uga aaddan shaqada Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka.
14. Dejinta istaraatiijiyad lagu yareynayo khilaafka ka dhasha wadaagga ama ka faa'iidaysiga khayraadka biyaha iyo soo saarista habraaca xallinta khilaafaadka.
15. U qareemidda horumarinta kaabeyaasha biyaha Puntland.
16. Dejinta habraacyada la xisaabtanka iyo kor-joogtaynta shirkadaha wadaagga ah ee adeegga bixiya.
17. Kor-joogtaynta iyo daba-galka heshiisyada ay Wakaaladdu gasho.

## Qodobka 7-aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Wakaaladda

Wakaaladdu waxay u-xil-saaran tahay:-

1. Maareynta iyo horumarinta agabka guud ee biyaha iyo hantida ma-guurtada ah ee ay mas'uulka ka tahay.
2. Taageeridda farsamo ahaan Wasaaradda ee arrimaha dejinta xeer-nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha lagama-maarmaanka u ah hirgelinta mabaadi'da iyo ujeeddooyinka Xeerkan markii looga baahdo.
3. Samaynta hagayaasha iyo halbeegyada shaqo ee ku saabsan sahminta, qodista ceelasha biyaha, dayactirrada bara-biyoodyada, dhisidda biyo-xireennada iyo ilaalinta tayada biyaha.
4. Samaynta qaybta maareynta isku-dhafan ee biyaha, kaasoo horseedi doona in si buuxda looga faa'iidaysto khayraadka biyaha, iyadoo la dhawrayo deegaanka.
5. Socodsiinta hawl-fulinta shaqada iyo isku-xirka dhinacyada si loo xoojiyo hawl wada-qabashada.
6. Horumarinta farsamooyinka qabashada biyaha roobka iyo dhimista qulqulka daadadka.
7. U gudbinta Wasaaradda warbixinta iyo xogta, si loo helo xogta saxda ah ee khayraadka biyaha.
8. Hirgelinta habab farsamo iyo dhaqameed oo keeni kara in si tashiilan biyaha looga faa'iidaysto.
9. Fulinta xeerarka, siyaasadaha, habraacyada iyo halbeegyada qeexaya tayada biyaha marka laga hadlayo biyaha cabitaanka, dib-u-isticmaalka dareeraha



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

ka soo noqda beeraha, musqulaha, haraaga wershadaha iyo dhawrista keydka biyaha ee dhulka hoostiisa ku jira, biyaha dusha dhulka yaal, biyo-badeedka xeebaha iyo khayraad-biyood kasta oo laga helo geyiga Puntland.

10. Hubinta in wershadaha sifeeya biyaha la cabbo ay raacaan halbeegyada iyo xeerarka u degsan habka sifaynta biyaha, si waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee lagu cabbiro tayada biyaha sifaysan ee loo oggolaan karo isticmaalka dadka.
11. Hubinta tayada biyaha shirkadaha, ceelasha, dur-durrada iyo ilaha si loo cabbiro heerbeegyada fayo-dhawrkooda loona go'aamiyo isticmaalka kala duwan ee biyaha deegaannada.
11. Dhisidda iyo dayactirka ceel biyoodyada, ilaha iyo biyo-xireennada, si loo helo adeeg biyood oo ku filan dadka iyo xoolaha, iyadoo la raacayo qorshaha Wasaaraddu dejisay iyo xeerarka la xiriira ilaalinta deegaanka.
12. Diyaarinta shaybaarro leh qalab casri ah oo lagu baaro tayada biyaha kala duwan.
13. Hirgelinta hab-maamulka adeegga biyaha, iyadoo kaashanaysa maamullada degmooyinka, degsiimooyinka iyo tuulooyinka aan markaas lagu maamulin habka wadaagga dawladda iyo dadweynaha iyadoo la raacayo habraacyo loo dejiyey.
14. Diyaarinta heshiishyada iyo bixinta rukhsadaha biyaha, qodista ceelasha cusub, dhismaha biyo-xireennada, waraha, berkedaha iyo maareynta biya-shareerrada, iyadoo la tix-gelinayo kala fogaynta, masaafada ay isu jiri karaan ceelasha biyaha iyo ilaalinta keyd biyoodka dhulka hoostiisa ku jira iyo diyaarinta heshiisyada shirkadaha biyaha, si waafaqsan habraaca ay Wasaaraddu u dejisay.
15. Xallinta khilaafaadka ka dhasha wadaagga iyo ka faa'iidaysiga khayraadka biyaha, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda lana raacayo habraacyadda ka degsan.
16. Samaynta iyo ilaalinta diiwaanka xuquuqda iyo waajibaadka biyaha la xiriira, kana mid yihiin macluumaadka biyaha, dhulka iyo habka dhaqan-dhaqaale ee u gaarka ah adeegsiga biyaha.
17. Jaangoynta iyo la socodka sicirka biyaha guud ahaan deegaannada Puntland.
18. Gelitaanka heshiisyada la xiriira mashaariicda horumarinta kaabayaasha biyaha.
19. La xisaabtanka iyo kor-joogteynta shirkadaha wadaagga ah ee adeegga bixiya.

## Qodobka 8-aad
## Awoodaha Maamulka Degmada

Degmadu waxay u-xil-saaran tahay;-

1. Kormeeridda adeegga biyaha ee lagu bixiyo habka wadaagga dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee heer degmo.
2. Degmadu waxay qayb ka noqonaysaa hannaanka soo xulidda iyo kala saaridda shirkadaha maamulka biyaha heer degmo.
3. Go'aan ka gaaridda qorsheyaasha horumarinta iyo maamulka khayraadka biyaha heer degmo, iyadoo la tashanaysa Wakaaladda.
4. Bixinta, naqshadaynta, ilaalinta iyo soohdimaynta dhulka u seeraysan horumarinta



ARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA STATE GENERAL SOLICI

iyo bixinta adeegga biyaha hadda iyo mustaqbalka.

5. Soo gudbinta baahiyaha biyood ee ka jira degmada iyo abaabulka bulshada, si ay uga qayb qaataan maamulka, dhismaha iyo dayactirka khayraadka biyaha.
6. Qiimaynta biyaha degmadu hesho iyo soo gudbinta wixii cabashooyin ah ee dadku ka qabaan tayada iyo qiimaha biyaha.
7. Kala talinta Wakaaladda ballaarinta adeegga biyaha iyo sicir-goynta qiimaha biyaha ee degmada.
8. Ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka ka dhasha wadaagga khayraadka biyaha ku yaalla xuduudaha degmada, iyadoo kaashanaysa Wakaallada iyo Wasaaradda.
9. Maamulka iyo bixinta adeegga biyaha ee hantida ma-guurtada ah ee laga wareejinayo sida uu qabo qodobka 18-aad Xeerkan.

## Qodobka 9-aad
## Wada-shaqaynta Hay'adaha Horumarinta Kaabeyaasha Biyaha

1. Hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ahba waa inay ku saleeyaan taageeradooda qorshayaasha istaraatiijiga ah ee horumarinta biyaha Puntland.
2. Waxaa reebban hirgelinta mashaariic biyood oo aysan qorshayn ama oggolaan Dawladdu.

# CUTUBKA 3-aad
# XUQUUQAHA ADEEGSIGA KHAYRAADKA BIYAHA
## Qodobka 10-aad
## Xaqa Muwaadinka ee Biyaha

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah oo ku filan baahiyihiisa asaasiga ah.
2. Qofna looguma diidi karo xaqa helitaanka biyaha sababo la xiriira haybtiisa, jinsigiisa, diintiisa, midabkiisa, shaqadiisa iyo argtidiisa siyaasadeed.

## Qodobka 11-aad
## Dammaanad-qaadka Xuquuqda Biyaha

Dammaanad-qaadka xuquuqda helitaanka biyaha dadka ku nool deegaannada Puntland guud ahaan waxaa mas'uul ka ah Dawladda, cid walbana waxaa kaga aaddan kaalin muhiim ah oo ay waajib tahay inay gudato si gaar ah, taasoo ah:-

1. **Dawladda:-**

   b) Qoondaynta dhaqaale ku filan maareynta helitaanka biyo dabooli kara baahiyaha dadka ku dhaqan Puntland.

   t) Awood siinta muwaadiniinta si ay u daboolaan baahidooda asaasiga ah ee helitaanka biyo ay u adeegsadaan arrimaha daryeelka fayo-dhawrka iyo wax-soo-



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

saarka.

j) Dhiirrigelinta maalgashiga caalamiga ah ee khayraadka biyaha Puntland, si loo dammaanad-qaado waaritaanka xuquuqaha adeegsiga iyo helitaanka biyaha ee deegaannada Puntland.

2. **Dadweynaha:-**

b) In si mas'uuliyadi ku dheehan tahay looga faa'iidaysto khayraadka biyaha, iyadoo mudnaanta la siinayo bulshada inteeda nugul.

t) Dhawrista xeer-dhaqameedyada biyaha Puntland, iyadoo xoogga la saarayo ilaalinta bed-qabka deegaan-biyoodka miyi iyo magaalaba.

J) Samaynta ururro bulsho oo u qareema una ololeeya helitaanka iyo waaritaanka khayraadka biyaha ee deegaannada Puntland.

3. **Hantiilayaasha:-**

B) Ka qayb-qaadashada iskaashiga maalgelinta khayraadka biyaha ee wadaagga ah, si aan ku dhisnayn ka doonista macaash xad dhaaf ah.

J) Inay si dhaw ula shaqeeyaan dawladda, si loo sameeyo habab wax-ku-ool ah oo lagu hubinayo in bulshada saboolka ah iyo kuwa nugul ay helaan biyo loo siman yahay oo la awoodi karo helitaankooda.

4. **Hay'adaha Caalamiga ah iyo Ururrada aan Dawliga ahayn:**

B) Maalgelinta horumarinta biyo-gelinta miyi iyo magaalo ee keydadka biyaha la cabbo iyo horumarinta keydadka guud ee biyaha Puntland, si kor loogu qaado nolosha dadka Puntland.

T) Taageeridda hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arrimaha maareynta khayraadka biyaha, si loo horumariyo awoodda iyo deg-deg u helidda biyaha, si loo gaaro ujeeddooyinka horumarineed ee waara.

## CUTUBKA 4-AAD
## DIIWAAN-GELINTA IYO RUQSADAHA

### Qodobka 12 -aad
### Ruqsadaha Biyo soo saarka

1. Waxaa reebban in deegaannada Puntland laga fuliyo hawlo la xiriira soo saaridda Biyaha ruqsad la'aan, cid kasta oo rabta inay biyo soo saarto waa inay heshaa oggolaansho sharci ah.
2. Habka ruqsad bixinta biyo soo saarka waxaa faah-faahinaya habraaca ay Wasaaraddu soo saarto, si waafaqsan Xeerkan.
3. Oggolaansha biyo soo saarka waa loo siman yahay waxaana reebban diidmada, hakinta iyo laalidda ruqsadaha, iyadoo cid gaar ah loo danaynayo ama loo xirayo.



XARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PU... STATE GENERAL SOLICIT...

## CUTUIBKA 5-aad
## KHIDMADAHA

### Qodobka 13-aad
### Khidmadda Kiraynta

1. Adeeg-bixiyaha maamulaya nidaam biyood ee haysta oggolaanshaha haw-galka waa in uu siiyo mulkiilaha xuquuqda biyaha khidmadda kiraynta, kiradaas waa in ay ku heshiiyaan labada dhinac, iyagoo raacaya habraaca la dajiyey.
2. Haddii xuquuqda biyuhu tahay mid dadweyne oo ay mas'uul ka tahay dawladdu, khidmaddu waxay noqonaysaa kharashka adeeg-bixinta, tan beddelka ama cusbooneysiinta agabka markii loo baahdo iyo sidoo kale qaybta qiimeynta agabka iyo qiima-dhaca oo qayb ka noqonaya heshiiska oggolaanshaha labada dhinac.
3. Adeeg-bixiyuhu waa in uu si joogto ah u baxsho khidmadda, iyadoo la raacayo arrimaha ku qeexan oggolaanshaha hawlgalka, xaddiga lacagta uu bixinayana waxaa lagu saleynayaa mugga biyaha laga gadey macaamiisha.
4. Qaybaha waaweyn ee khidmadda oo ay ku jirto khidmadda kiradu waa in sannad kasta si cad loogu soo bandhigo macaamiisha si dadweynuhu ula socdo.

### Qodobka 14-aad
### Khidmadda Soo-saarka

1. Qof kasta oo isticmaalka biyihiisu waajibinayo lahaanshaha ruqsad soo-saar, waa in uu bixiyo khidmadda soo-saarka ee ku waajibtay, taasoo ay mas'uul ka tahay Wasaaradda Maaliyadda ama ciddii ay u wakiilatay.
2. Ujeeddada qaadista khidmadda soo-saarka waa maalgelinta maareyn joogteysan khayraadka biyaha ee Puntland, taasoo ay ku jiraan ballaarinta, dayactirka iyo keydinta xogaha ceelasha biri-qoddeyga ah ee Puntland iyo nidaam ilaaliyaha khayraadka biyaha dhulka hoostiisa ku jira.
3. Qiimaha khidmadda soo-saarka, mugga biyaha la soo saarayo, laalidda ku-dhaqanka shuruucda guud, waxaa lagu qeexayaa Xeer-nidaamiyeyaasha uu yeelan doono Xeerkan.
4. Khidmadda soo saarku waxay ku salaysan tahay mugga biyaha la soo saaro ama la isticmaaley.
5. Qaybaha waaweyn ee lacagaha la qaado oo ay ku jirto khidmadda soo saarka biyaha waa in sannad kasta si furan loo soo bandhigo, laguna muujiyo xogta macaamiisha si dadweynuhu ula socdaan.

### Qodobka 15-aad
### Canshuurta Iibka

Iibka adeegga biyaha magaalooyinka iyo deegaannada kale ee u qalma waxaa ku waajibaysa cashuurta iibka, iyadoo loo raacayo Xeerka Cashuuraha iyo Hannaanka Maamulka Maaliyadda ee DPL.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 16-aad
## Lacag-bixinta Gaarka ah

1. Waxaa lagu soo rogi karaa lacag-bixin gaar ah shakhsi ama shirkad gaar ah, kaasoo ku xad-gudbay shuruudihii oggolaanshaha ama isticmaalay biyo ka badan intii loo fasaxay.
2. Xaddiga lacag-bixinta gaarka ah waxaa jaan-goynaya Xeer-nidaamiye gaar ah oo ay soo saarto Wasaaraddu, iyadoo tix-gelinaysa talooyinka Wakaaladda Biyaha.

# CUTUBKA 6-aad
# LAHAANSHAHA IYO MAAMULKA HANTIDA MA GUURTADA

## Qodobka 17-aad
## Lahaanshaha Biyaha Dabiiciga ah iyo Agabka

1. Lahaanshaha biyaha dabiiciga ah waxaa leh dawladda oo ka wakiil ah dadweynaha, lagamana wareejin karo si aan ahayn sifo sharci ah.
2. Dhammaan agab-biyoodka lagu dhisay hanti dawladeed ama mid deeq ah waa hanti guud oo ay leeyihiin dadweynaha Puntland, dawladduna mas'uul ka tahay.
3. Si gaar ah loogama faa'iidaysan karo biyaha dadweynaha, waxaana ilaalintooda iyo isticmaalkooda lagu dhaqayaa Xeerkan.

## Qodobka 18-aad
## Maamulka Hantida Ma-guurtada ah ee Biyaha

1. Maamulka xuquuqda isticmaalka hantida ma-guurtada ah waxaa u-xil-saaran Wakaaladda, waxaana lagu wareejin karaa dawladda hoose, shirkad gaar loo leeyahay ama mid wadaag ah muddo cayiman oo aan ka badnayn (5) shan sano waana la cusboonaysiin karaa haddii lagu qanco marka la qiimeeyo ka dib.
2. Wareejintu waxay ku imaanaysaa heshiis qoraal ah oo waafaqsan Dastuurka, Xeerkan, Xeerarka kale ee dalka, habka tartanka iyo ganacsiga xorta ah.
3. Dawladda Hoose iyo shirkadahu awood uma leh iibinta, bixinta, beddelidda iyo ku wareejinta gacan saddexaad hanti ma-guurto ah oo ay ku aamineen Wasaaradda iyo Wakaaladdu.
4. Waxaa reebban in cid si gaar ah loogu xiro maamulka xuquuqda isticmaalka hantida ma-guurtada ah ee biyaha.

## Qodobka 19-aad
## Dib-ula-noqoshada Maamulka Biyaha

1. Wakaaladdu waxay go'aamin kartaa dib ula noqoshada oggolaanshaha maamulka biyaha, haddii shirkadaha biyuhu si habboon u bixin kari waayaan adeegga biyaha.
2. Marka dawladdu la soo noqoto maamulka biyaha, waa in dawladdu qaaddaa mas'uuliyadda bixinta adeegga biyaha goobaha shirkadihii hore u maamulayeen.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 20-aad
## Maamulka Agab-biyoodka

Waxaa ku waajibaya cid kasta oo maamulaysa agab biyood;-

1. Sii wadidda bixinta adeegyada biyaha, joogtaynta maamul hufan iyo isku-dubba ridka agabka adeegga biyaha.
2. Diyaarinta dhaqaale ku filan cusbooneysiinta iyo dayactirka agabka, iyadoo la tix-gelinayo mudadda jiritaanka qaybaha kala duwan ee agabka.
3. Qorsheynta ballaarinta baahida biyaha ee kordhaysa.

# CUTUBKA 7-aad
# MAALGASHIGA KHAYRAADKA BIYAHA

## Qodobka 21-aad
## Maalgashiga Dawladda Dhexe ee Kaabeyaasha Biyaha

1. Maalgelinta Dawladdu waa inay waafaqsan tahay qorshaha mudnaanta horumarinta Puntland ee ay dejiso Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
2. Kaabe-biyood la hirgeliyey waa hanti guud, waana in lagu qoro diiwaanka hantida guud ee Dawladda, laguna wareejiyo heerka ugu hooseeya ee ku habboon, awoodna u leh qaadista mas'uuliyadda adeeg-bixineed.
3. Maalgelinta dawladda ee kaabeyaasha adeegga biyaha waa mid loo siman yahay, cidna si gaar ah loogama faa'iidayn karo.

## Qodobka 22-aad
## Maalgashiga Degmooyinka ee Kaabeyaasha Biyaha

1. Heerka dawladeed ee ugu hooseeya ee awoodda u leh maalgelinta iyo bixinta adeegga biyuhu waa Dawladaha Hoose oo kaashanaysa dawladda dhexe.
2. Maalgashiga degmooyinka ee kaabeyaasha biyo-soo-saarka bixinta adeegga guud ee biyaha waa in uu waafaqsan yahay Xeerkan iyo hab-raacyadiisa.
3. Kaabe biyood ay maalgelisey degmadu, iyadoo isticmaaleysa hantida guud waxaa iska leh dawladda, waana in lagu qoro diiwaanka hantida ma-guurtada ah ee dawladda.

## Qodobka 23-aad
## Maalgashiga Ganacsatada ee Kaabeyaasha Biyaha Cusub

1. Cid kasta oo haysata oggolaansho maamulka bixinta adeegga biyaha si waafaqsan Qodobka 18-aad ee xeerkan waxay maalgelin ku samayn kartaa agab biyoodka ay mas'uulka ka yihiin.
2. Maalgelinta shirkadaha iyo shakhsiyaadka gaarka ah ee kaabeyaasha biyaha ee u adeegaya dan guud waa in ay waafaqsan tahay qorshaha horumarinta biyaha



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Dawladda.

3. Kaabeyaasha biyaha ee si buuxda ay u maalgashadeen hal ama dhawr maalgeliye waxaa laga soo qaadayaa kuwa gaar loo leeyahay, xitaa haddii kaabaha laga hadlayaa uu yahay mid biyaha siinaya dadweynaha.
4. Haddii kaabeyaashaas gaarka ah lala wareego si loola mideeyo nidaam kaabeyaal guud, waa in magdhaw la siiyo ganacsatadii gaarka ahaa ee iska lahaa kaabeyaasha.
5. La wareegidda iyo Magdhawga kaabeyaasha ama agabka waxaa lagu salaynayaa mabaadi'da caalamiga ah ee qiima-dhaca, kuwaasoo loo isticmaalo qiimeynta kaabeyaasha biyaha, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka ka degsan arrimaha maalgashiga iyo la wareegidda hantida gaarka ah.

## Qodobka 24-aad
## Maalgelinta Ganacsatada ee Kaabeyaal Biyood oo Jiray

1. Haddii loo baahdo in shakhsiyaad ama shirkado gaar ahi maalgeliyaan nidaam-biyood guud, iyadoo ujeeddadu tahay ballaarin ama cusboonaysiin waa in la caddeeyaa habka midaynta kaabeyaashaas iyo maalgelinta cusub, iyadoo loo marayo si waafaqsan qodobka 18-aad ee xeerkan lana waafajiyaa Dastuurka iyo xeerarka la xiriira.
2. Maalgashiga ganacsatada ee kaabeyaasha biyaha jiray waxaa loo raacayaa habraac qeexaya qiimaynta haraaga maalgelinta gaarka ah, magdhawga khasaaraha ku yimaada lahaanshaha gaar ahaaneed, diiwaanka agabyada, kaabeyaasha iyo noocyada maalgelinta uu qof gaar ah ku sameeyo nidaam-biyood guud.
3. Maalgelinta qof gaar ah sameeyo waxay noqonayaan;-
   b) Ka shaqeynta, dayactirka iyo beddelka qaybo lagama maarmaan u ah sidii nidaamku u sii joogtayn lahaa heerkii hore ee wax-soo-saar.
   t) Ka shaqeynta, dayactirka, beddelka iyo ballaarinta nidaamka, kuwaasoo suurto-gelinaya horumarka hab-socodka adeegga biyo-bixinta.
4. Kharashka xarafka (t) oo keliya ayaa loo aqoonsan yahay inuu yahay maalgelin mudan in magdhaw laga bixiyo.

# CUTUBKA 8-aad
# BIYO-SIINTA MAGAALOOYINKA

## Qodobka 25-aad
## Mas'uuliyadda Biyo-siinta Magaalooyinka

Mas'uuliyadda biyo-siinta magaalooyinka waxaa iska leh Wakaaladda, Dawladda Hoose iyo ciddii sifa sharci ah loogu wareejiyo oo adeeg bixiye ah.



CARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 26-aad
## Hawl-galka Biyo-siinta Magaalooyinka

1. Wakaaladdu iyadoo kaashanaysa dawladaha hoose waxay u wakiilan kartaa hawl-galka iyo maareynta adeegga biyaha shirkad awood u leh, iyadoo loo marayo hab tartan furan oo waafaqsan sharciga qodobka 18-aad ee Xeerkan.
2. Si loo kormeero haw-galka adeeg-bixinta iyo hawl-galka heshiiska, Wasaaradda, Wakaaladda iyo Dawladda Hoose ayaa si wada jir ah u magacaabi kara guddi biyood oo madax-banaan, kaasoo ka kooban xubno metelaya wakiillada maxalliga ah ee daneeyayaasha kala duwan.
3. Adeeg-bixiyuhu waxaa uu noqon karaa: -
   - b) Wakaaladda marka ay dhacdo in la waayo ganacsato ama dawlad hoose oo oggol maareynta bar-biyood cayiman.
   - t) Dawladda Hoose way noqon karta adeeg-bixiye, marka ay sabab jirta awgeed u wakiilato Wakaaladdu.
   - j) Adeeg-bixiye gaar loo leeyahay oo madax-banaan, kaasoo lagu xushay hab tartan furan ah sida ku cad Qodobka 18-aad ee Xeerkan.
   - x) Adeeg-biyood wadaag ah oo shuraako ay ku yihiin Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay kaasoo loo marayo si waafaqsan Xeerkan.
4. Heshiiska wareejinta rasmiga ah ee dhexmara Wakaaladda iyo adeeg-bixiyaha waxaa lagu magacaabaa "Heshiiska Hawl-galka" wuxuuna qeexayaa arrimaha soo socda;-
   - b) Mas'uuliyadaha adeeg bixiyaha.
   - t) Muddada adeeg bixinta.
   - j) Soohdinta dhulka uu adeeg-bixiyuhu biyaha siinayo.
   - x) Heerarka noocyada adeegga uu adeeg-bixiyuhu mas'uul ka yahay in uu gaarsiiyo ka faa'iidaystayaasha.
   - Kh) Halbeegga farsameed ee ay tahay in uu adeeg-bixiyuhu ilaaliyo marka uu fulinayo shaqooyinka dayactir, dib-u-habeyn iyo horumarin, kuwaasoo ay ka mid yihiin xarumaha matoorrada iyo xiriirinta nidaamka biyood ee biyaha gaarsiinaya ka faa'iidaystayaasha.
   - d) Xaddiga sicirka uu adeeg-bixiyuhu ku qaadanayo adeegga uu bixinayo iyo arrimaha jaangoynaya qiimaha iyo isbeddelka sicirka inta lagu jiro xilliga heshiiska.
   - r) Khidmadda kirada uu siinayo adeeg-bixiyuhu Dawladda ee ku salaysan magdhawga isticmaalka agabka guud.
   - s) Dammaanad-qaadka inuu adeeg-bixiyuhu siiyo Dawladda khidmadda soo-saarka khayraadka biyaha iyo isticmaalkooda.
   - Sh) Diiwaan dhammeystiran ee agabka guud ee lagu wareejiyey adeeg-bixiyaha si uu u bixiyo adeegga, kaasoo si buuxda u qeexaya agabkaas qiimahooda maalintii la galay heshiiska, saxiixa iyo xeer-



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

nidaamiyeyaasha tilmaamaya xisaabinta qiimaha dambe, iyadoo la tix-gelinayo qiima-dhaca ku imanaaya agabka.

Dh) Hubinta hufnaanta iyo isla-xisaabtanka in adeeg-bixiyuhu u gudbiyo Wakaaladda iyo Guddiga Biyaha warbixino ku saabsan hawl-galka iyo dhaq-dhaqaaqa maaliyadeed, si loo sugo kormeerka hawl-qabadkiisa.

c) Halbeegga hawlqabadka ay tahay in uu gaaro ama ilaaliyo adeeg-bixiyuhu marka uu bixinayo adeegga biyaha.

g) Qeexid buuxa ee shaqooyinka uu qabanayo, isla markaasna maalgelinayo adeeg-bixiyuhu muddada heshiiska oo aan ka badnayn (5) sano si wafaqsan Xeerkan.

f) Xaaladaha uu heshiiska ku jebin karo dhinac ka mid labada dhinac ee heshiisku dhex maray.

5. Guddiga Biyuhu waa dhex-dhexaadin karaa khilaafka ka dhex aloosan Wakaaladda Biyaha iyo adeeg-bixiyaha kuna saabsan tarjumaadda nuxurka heshiiska.
6. Heshiisyada adeeg bixinta khayraadka biyaha waxaa laga diiwaan-gelinayaa Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 27-aad
## Qorshaha Cusboonaysiinta Kaabeyaasha Biyaha

1. Adeeg-bixiye kasta waa in uu qorshihiisa Miisaaniyadeed ku qoondeeyaa dhaqaale gaar ah oo loogu tala-galay cusboonaysiinta iyo ballaarinta nidaamka biyaha uu mas'uulka ka yahay.
2. Xaddiga dhaqaalaha lagu tala-gelayaa oo lagu cabbirey boqolley, waa inuu ku cad yahay Heshiiska Hawl-galka.
3. Adeegsiga dhaqaalaha kor ku xusan waxaa uu ku salaysanaanayaa barnaamij maalgelineed oo cusub, kaasoo sannadle ah oo ay isla garteen labada dhinac ee heshiisku dhexmaray.

# CUTUBKA 9-aad
# BIYO-SIINTA DEEGAANNADA MIYIGA

## Qodobka 28-aad
## Maareynta Kaabeyaasha Biyaha Deegaannada Miyiga

1. Wasaaradda, Wakaaladda iyo Dawladaha Hoose ayaa si wadajir ah u xuli doona ururro laga soo doortay ka faa'iidaystayaasha, waxay ku dhiirrigelinayaan in ay abuuraan ururro metelaya ka faa'iidaystayaasha biyaha.
2. Ururrada ka faa'iidaystayaasha biyuhu oo gacan ka helaya Dawladaha Hoose iyo Wakaaladda ayaa maamulaya kaabeyaasha biyood ee deegaankooda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 29-ad
## Maareynta Kaabeyaasha Biyaha Miyiga ee Adeeg-bixiye Gaar ah

1. Adeeg-bixiyuhu waxaa uu awood u leeyahay u wakiilashada hawl-gelinta iyo maareynta adeeg-biyood guud cid kale oo karti u leh oo noqon kara shirkad ama shakhsi.
2. Heshiiska wakiilashada bixinta adeeg-biyoodka deegaannada miyiga ah, waxaa loo raacaya habraac gaar ah oo ay dejiso Dawladda Hoose si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 30-aad
## Maareynta Degmada ee Kaabeyaasha Biyaha Miyiga

1. Dawladaha hoose ee degmooyinku waxay noqon karaan adeeg bixiye deegaan gaar ah oo ka mid ah degmadaas, marka uusan jirin adeeg bixiye gaar ah ee goobtaas.
2. Xilalka iyo waajibaadka Qaybta Maareynta Biyaha ku xusan farqada 1-aad ee Qodobkan waa in lagu qeexaa Xeer-nidaamiye gaar ah.

## Qodobka 31-aad
## Kaabeyaasha Biyaha Miyiga ee Gaarka loo Leeyahay

Kaabeyaasha biyaha ee gaarka loo leeyahay kuna yaal meelaha miyiga ah loogana faa'iidaysto si gaar ah waxaa maamulaya mulkiilayaashooda, waxaana waajib ku ah in loo raaco Qodobada ka faa'iidaysiga iyo bixinta adeegga biyaha.

## CUTUBKA 10-aad
## WARAABINTA XOOLAHA

## Qodobka 32-aad
## Baro-biyoodka Miyiga

1. Baraha biyoodka miyigu waxay ku kooban yihiin biyaha fadhiya loogana faa'iidaysto ujeeddooyinka xoolo-dhaqashada, sida waraabka xoolaha, ka faa'iidaysiga biyaha guriga ee bulshada xoolo-dhaqatada ah, mana khuseeyaan qodobada Xeerkani biyaha booyaduhu xoolaha u dhaamiyaan ama lagu keenay waddo kale oo aan ahayn bar-biyood fadhida.
2. Fulinta iyo hirgelinta arrimaha qodobkan ku xusan waa in mudnaanta la siiyaa xeer-dhaqameedka soo-jireenka ah ee lagu dhaqo arrimaha la xiriira isticmaalka biyaha ee miyiga marka laga reebo meelaha gaarka loo leeyahay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 33-aad
## Xuquuqda Xoolaha ee Baro-biyoodka Miyiga

Heerarka kala duwan ee Dawladdu sida Wasaaradda, Wakaaladda iyo dawladaha hoose oo kaashanaya bulshada waxaa waajib ku ah xaqiijinta helitaanka bar-biyood miyi oo ku filan baahiyaha xoolaha.

## Qodobka 34-aad
## Qorsheynta iyo Nidaamintaa Baro-biyoodka Xoolaha

1. Qorsheynta iyo nidaaminta khayraadka biyuhu waa mas'uuliyadda Dawladda, gaar ahaan baro-biyoodka xoolaha, kuwaasoo saamayn ku yeelan kara deegaanka iyo nabadgelyada.
2. Bar-biyood cusub oo aan oggolaasho looga haysan Dawladda hoose lama samayn karo, si looga hortago khilaafka beelaha, waxaana reebban samaynta bar-biyood cusub in laga hirgeliyo deegaannada dhaca cirifka iyo soohdimaha laba degmo u dhexeeya, si looga baaqsado khilaafka degmooyinka.

## Qodobka 35-aad
## Ilaalinta Deegaanka Baro-biyoodka Miyiga

Waxaa waajib ah ilaalinta deegaanka bar-biyoodka si looga hortago xaalufka dhulka, iyadoo la dhawrayo Xeerka ilaalinta Maareynta Deegaanka iyo Xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka.

## CUTUBKA 11-aad
## BIYAHA WARAABKA
## Qodobka 36-aad
## Xuquuqda Biyaha Waraabka

1. Biyaha waraabka waxay ku kooban yihiin bar-biyood kasta oo looga faa'iidaysto ujeeddooyinka waraabka beeraha oo ka baxsan heerarka baahida aasaasiga ah iyo waraabka xoolaha.
2. Xeerkani wuxuu aqoonsan yahay, jidaynayaa, awood siinayaa, oggolaanayaa xeer-dhaqameedka soo jireenka ah ee dhaqan ahaan loo adeegsado xallinta khilaafaadka khuseeya biyaha waraabka ah.

## Qodobka 37-aad
## Mudnaanta ka Faa'iidaysiga Biyaha

Haddii ay timaaddo xaalad biyo yaraan oo ay suurogal noqon weydo ka faa'iidaysiga biyaha si siman, waxaa mudnaanta la siinaya Dadka, Xoolaha iyo Beeraha.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 38-aad
## Maareynta Baro-biyoodka Waraabka

Wakaaladda oo kaashanaysa Wasaaradda, raacaysana qorshaha iyo astaynta Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka waxay u-xilsaaran tahay sahminta iyo diyaarinta khayraadka biyaha sida ceelal, ilo, biyo-xireenno iyo haamaha waaweyn ee loogu baahan yahay keydka waraabka beeraha, maareynta waraabka beeraha iyo ilaalintooda, waxaa u-xilsaaran Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka.

# CUTUBKA 12-aad
# ILAALINTA FAYO-DHAWRKA IYO TAYADA BIYAHA

## Qodobka 39-aad
## Mas'uuliyadda Guud ee Ilaalinta Tayada Biyaha

Hubinta tayada iyo fayo-dhowrka biyaha Puntland waa mas'uuliyad wadareed, Wakaaladda oo kaashanaysa Wasaaradda ayaa u-xil-saaran hirgelinta dhammaan arrimaha la xiriiira qodobkan sida; -

1. Qeexidda heerarka halbeegyada ugu yar tayada biyaha, si ay ugu hoggaansamaan shirkadaha bixiya adeegyada biyaha iyo mulkiilayaasha wershadaha biyo-sifeynta iyo weliba dadka ku hawlan hawlgalka biyo-siinta guryaha, ganacsiga, wershadaha iyo beeraha.
2. Yagleelidda iyo dayactirka shaybaarrada iyo tasiilaadka kale si loola socdo, loo baaro loona xaqiijiyo tayada wax kasta oo biyo-bixin ah, waxaana maamulka iyo farsamada shaybaarrada u-xilsaaran Wakaaladda.
3. Dejinta habraaca ruqsad siinta shaybaarrada gaarka loo leeyahay ee loo aasaasay tijaabinta iyo hubinta tayada biyaha ujeeddo kasta ee loo adeegsanayo oo ay ku jiraan shuruudaha looga baahan yahay farsamo-yaqaannada shaybaarrada biyaha.
4. Caddeynta shuruudaha tayada biyaha dib loo rogay, si loo hubiyo in biyaha noocaas ahi ay yihiin kuwo ammaan ah oo ku habboon isticmaalkii loogu tala-galay.
5. Diyaarinta hannaanka qiimaynta iyo ansixinta habka sifaynta biyaha la cabbo, ka hor inta aan la bixin ruqsadda.
6. Diyaarinta barnaamij qaran oo lagu baaro laguna kormeero hawlgallada adeeg bixiyayaasha, Wershadaha sifeeya biyaha iyo weliba kartida dadka ku hawlan ka shaqeynta adeegyada biyaha.

## Qodobka 40-aad
## Mas'uuliyadaha Degmada ee Ilaalinta Tayada Biyaha

1. Degmadu waxay u-xilsaaran tahay hubinta ku dhaqanka heerbeegyada tayada biyaha ay dejisay Wakaaladdu.
2. Haddii biyaha cabitaanka ay wershaduhu qaybinayaan ka hooseeyaan halbeegyada



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

biyaha, taasoo lagu hubiyey shaybaar sharciyad haysta waxay Dawladda Hoose ka joojinaysaa adeeg-bixiyaha shaqada adeegga biyaha ilaa uu raaco halbeegyada degsan.

3. Adeeg-bixiyuhu dib uma bilaabi karo hawlihii biyo-sifaynta ama qaybinta ilaa shaybaarka dhexe ee Wakaaladda Biyaha laga helo warbixin qoraal ah oo caddeynaysa fayo-dhawrka biyaha laguna shaaciyo warbaahinta DPL, si dadweynuhu kalsooni u helaan.

## Qodobka 41-aad
## Mas'uuliyadaha Adeeg-bixiyaha ee Ilaalinta Tayada Biyaha

1. Adeeg-bixiyuhu wuxuu mas'uul ka yahay hubinta in biyaha la cabbayo waafaqsan yihiin halbeegyada tayada ay Wakaaladdu dejisay.
2. Adeeg-bixiyuhu waa inuu ku xalliyo dhibaatooyinka tayada biyihiisa muddo 30 cisho aan ka badnayn, waxaana hubinaya fulinta Wakaaladda iyo Dawladda hoose.
3. Adeeg bixiyuhu wuxuu dammaanad-qaadayaa saamaynta ka dhalata isticmaalka biyaha aan nadiifta ahayn, waxaana ku waajibaya magdhaw si waafaqsan Xeerkan.

# CUTUBKA 13-aad
# ILAALINTA BIYAHA HOOSE

## Qodobka 42-aad
## Sahanka Biyaha Dhulka Hoose

Hawlaha sahanka biyaha waxaa samayn kara cid walba oo oggolaansho haysata si waafaqsan habraaca ku xusan Qodobka 11-aad ee Xeerkan.

## Qodobka 43-aad
## Baraxa iyo Kordhinta Biyo-Duleedka

Waxaa reebban barax iyo kordhin kasta oo saamayn kara biyaha duleedka waana in ay Wakaaladdu si adag u kormeerto barnaamijka biyo-kordhinta, si looga ilaaliyo khayraadka biyaha ee dhulka dushiisa khataraha dikhowga iyo hoos u dhaca tayadooda.

## Qodobka 44-aad
## Ilaalinta Dhulka Ceelasha Biri-qoddayga ah

1. Dhulka ku dhaw ceelasha biri-qoddeyga ah ee biyahooda loo isticmaalo ujeeddooyin cabitaan waa dhul ilaashan ayna waajib tahay in Dawladda Hoose ilaaliso.
2. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyeyaal hagaya hab-maamulka, jaantuska, iyo xadeynta dhulka ilaashan iyo hawlaha ka reebban xayndaabkaas dhuleed, kaasoo ay hirgelinayso Wakaaladdu.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 45-aad
## Ceel-qodista

Hawlaha soo-saarista biyaha dhulka iyo qandaraaslayaasha riigaga waxaa loo raacayaa Xeer-nidaamiyeyaasha, habraacyada iyo hagayaasha ay Wakaaladdu soo saarto si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 46-aad
## Kormeerka iyo Qiimaynta Biyaha

1. Wakaaladda iyo Bahwadaagta Horumarinta Biyaha waa inay diyaariyaan, dhaqangelka nidaamka kormeerka iyo qiimaynta ee Khayraadka Biyaha Puntland.
2. Wakaaladdu waxay ka dalbi kartaa muwaadin kasta inuu u soo gudbiyo xog gaar ah, dukumentiyo, muunado ama qalab, si joogta ah ama muddo cayiman.
3. Wasaaraddu waa inay qeexdaa shuruudaha keydinta iyo gudbinta xogta khayraadka biyaha.
4. Wasaaraddu waxay xogta la wadaagaysaa Xarunta Maareynta Xogaha Khayraadka Biyaha iyo Dhulka, halkaasoo ay ka heli karaan muwaadiniintu xogta.

## Qodobka 47-aad
## Ilaalinta Dhulka Biyo-qabatinka ah

1. Wakaaladdu iyadoo kaashanaysa dawladaha hoose waxay u-xil-saaran tahay ilaalinta dhulka biyo-qabatinka ah, haddii ay caddaato in dhulkaas u nugul yahay halis deegaan waxay qaadi kartaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah ilaalinta dhulkaas biyo-qabadka ah ama qayb ka mid ah, waxaana la soo saarayaa amar ka dhigaya dhulkaas aagga seeraysan.
2. Dawladaha Hoose waxay soo rogi karaan shuruudo, xayiraad ama mamnuucid dhaqdhaqaaq gudaha ama hareeraha dhulkaas la seereeyey, iyadoo raacaysa talooyinka Wakaaladda Biyaha ee ku aaddan ilaalinta dhulka iyo khayraadkiisa biyood.

# CUTUBKA 14-aad
# ILAALINTA BIYO-DULEEDKA

## Qodobka 48-aad
## Isticmaalka iyo Xadeynta Biyo-duleedka

1. Wax oggolaansho ah uma baahna isticmaalka biyaha dabiiciga ah ee dhulka korkiisa ku sugan marka laga reebo waraha, haddii ka faa'iidaysiga biyahaas aan lagu sameyn ficilo keeni kara isbeddel ku yimaada qulqulka ama socodka dabiiciga ah ee biyahaas.
2. Waxaa ka reebban ka faa'iidaysiga biyo-duleedka xoog kula wareegga, baraxa, weecinta biyo-duleedka, ku shubidda biyaha walxo adag, walxaha laga soo saaray



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

moosaska hoostooda ama harooyinka ay ku jiraan biyo-qabatinnadu.

3. Xaqa xooluhu u leeyihiin biyo cabbitaan sida ku cad qodobka 33-aad ayaa waajibinaya in xooluhu helaan dhul marin ah, iyadoo aan kiro la weydiin ama la is-hortaagin.

## Qodobka 49-aad
## Hawlaha Horumarinta Biyo-Duleedka

1. Wakaaladdu iyadoo raacaysa siyaasada Wasaaradda waxay soo saaraysaa tilmaamayaasha hawl-galka nidaamka biyo-keydinta gaar ahaan xaddiga ugu sarreeya iyo kan ugu hooseeya ee biyaha la sii deyn karo, jadwalka miilaysiga, xilliyada la sii deynayo iyo biyaha la leexin karo.
2. Xaddiga biyaha ugu hooseeya ee la siin karo iyo tilmaamaha kale ee maareynta keydka biyaha waa in la qeexaa, si loo ilaaliyo xuquuqaha muwaadiniinta.
3. Waxaa la laali karaa lahaanshaha dhulka iyo xuquuqaha biyaha ee gaarka ah, si loo hirgeliyo hawlo adeeg-biyood ee dadweyne, ka dib marka ay lagama marmaan u tahay danta guud, si waafaqsan Xeerkan.
4. Mulkiilaha dhulka lala wareegay wuxuu yeelanayaa magdhaw u dhiganta, iyadoo heerka iyo xadka magdhawga ay si wadajir ah u go'aaminayaan Dawladda Hoose iyo Wakaaladda ama haddii ay jirto hay'ad si gaar ah u qaabilsan qiimeynta hantida gaarka ah.

## Qodobka 50-aad
## Isticmaalka Biyo-duleedka Keydsan

1. Mulkiilaha leh biyo keydsan waa in uu uga faa'iidaysto isticmaalkooda si waafaqsan Xeerkan.
2. Ka faa'iidaygisa biya-duleedka aan cidi si gaar ah u lahayn waa loo siman yahay, haddii cid gaar ahi uga baahato inay uga faa'iidaysato isticmaal gaar ah waxay soo gudbinaysaa codsi oggolaansho.
3. Oggolaansho lama bixin karo haddii ay caddaato in biyo isticmaalka la soo codsaday keenayo jebinta qodob ka mid ah Xeerkan.
4. Wakaaladdu waxay go'aaminaysaa tallaabooyinka farsameed ee loo baahan yahay in la qaado, si loo ilaaliyo xuquuqda dadka ay saamayn taban ku yeelatay yaraanta, leexinta ama joogsiga qulqulka biyaha sida gaarka ah looga faa'iidaystay.
5. Haddii khasaare ka dhasho, xal farsameed oo dhigmana bulshadu keeni kari weydo, waxaa go'aan ka gaaraya magdhawga khasaaraha dhashay Maxkamadda awoodda u leh.
6. Qof kasta oo codsanaya ruqsad biyo-ka-qaadasha bar-biyood dhulka korkiisa ah, waa inuu soo gudbiyo xogaha iyo macluumaadka lagama maarmaanka ah oo ay ka mid yihiin qorsheyaasha, dhulalka, muuqaallada, dukumentiyada iyo xisaabaadka caddeynaya ujeeddooyinka iyo astaamaha farsameed.
7. Marka la qiimaynayo codsiga waa in la sameeyo daraasad ku wajahan faa'iidooyinka dhaqaale iyo saamaynta deegaan ee ay yeelan karaan arrimaha la codsaday.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
STATE GENERAL SOLICITOR

8. Si loo hirgeliyo arrimaha uu qeexayo qodobkan waa in Wakaaladdu u hawl-gashaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah.

## Qodobka 51-aad
## Xaqa Isticmaalayaasha Deggan Biyo-shubka Hoose

1. Waxaa waajib ah ilaalinta xuquuqda isticmaalayaasha biyaha ee deggan biya-shubka hoose marka la bixinayo ruqsadda biyo qaadasho ee la xiriirta ka faa'iidaysi gaar ahaaneed, lamana bixin karo ruqsad wax u dhimaysa xuquuqda biyood ee isticmaalayaasha biyo-shubka hoose.
2. Dhammaan isticmaalayaasha bar-biyood kasta oo dhulka korkiisa ah waa u siman yihiin xuquuqda isticmaalka biyaha deegaannada biyo-shubka hoose ama biyo-shubka sare ee biyo-mareenka.
3. Isticmaalayaasha biyo-shubka sare ma hor-istaagi karaan qulqulka dabiiciga ah ee daadegga biyaha, daadka iyo biyaha dheeraadka ah ee ka bata xaddiga sare ee loo oggol yahay ruqsadda soo-saarka.
4. Isticmaalaha deggan biyo-shubka sare mas'uul kama aha loomana qabsan karo waxyeello ay keeneen haraaga qashin ama shay kale ee fariistay qulqulka hoose, kuwaasoo daadegga hoose ku yimid soo raaca qulqulka dabiiciga ah ee biyaha soconaya marka aanu ku shubin wasakh nooc kasta ay tahay.
5. Wakaaladda, hay'ad, shirkado, ama shakhsiyaad la siiyey ruqsad oo keliya ayaa ka dhisi kara biyo-xireen tog dhexdiis.
6. Waxaa waajib ku ah Wakaaladda iyo cid kasta oo kale inay hubiso in biyo-xireenku uusan u lahayn waxyeello Amni ama Dhaqaale dadka ku nool biyo-shubka hoose, waxaana magdhaw ay qiimaysay maxkamad lagu yeelanayaa Wakaaladda ama ciddii kale ee dhistay biya-xireenkaas, marka ay dhibaato ka dhalato.

## Qodobka 52-aad
## Baraxa Biyo-duleedka

1. Laguma shubi karo biyo wasakhaysan iyo dareere kale oo kasta gudaha biyo-duleedka si toos ah ama si dadban oggolaansho la'aan, waxayna Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa Wasaaradda Caafimaadka iyo Dawladaha Hoose soo saaraysaa Xeer-nidaamiyeyaal xadeynaya marka biyaha kuwo kale lagu daro, xaddiga iyo heer wasakheedka walxaha aan khatar caafimaad keenayn ee lagu dari karo biyaha.
2. Waxaa reebban ku-darid haddii uu isbeddel ku keenayo astaamaha duleed, kiimikeed iyo bayoo-lajiyeed ee biyo-duleedka, taasoo dhibaato iyo khatar ku keeni karta dadka, xoolaha, dhirta iyo deegaanka.
3. Waa in Xeer-nidaamiye lagu hago baraxa togagga biyaha iyo biyo-keydiyeyaasha, kuwaasoo durdur ah ama xilliyo biyo soo rogga.
4. Heshiis kasta oo lala gelayo kooxo gaar ah kuna saabsan baraxa biyaha ama dikhaynta marinnada biyaha waa waxba kama jiraan haddii ay ka hor imaanayaan Xeerkan.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 53-aad
## Ku darka Walxaha Adag

1. Waxaa reebban in lagu daadsho ama lagu daro biyaha-duleed ama togaggooda, walax kasta oo keeni kara dikhaw, isbeddel heerka biyaha, is-hortaagi karta qulqulka iyo qaybinta biyaha ama halis gelin karta biyaha iyo ka faa'iidaystayaasha.
2. Dhisme aan xiriir la lahayn khayraadka biyaha lagama samayn karo gudaha marin-biyood qallalan ama dooxo biyo-mareen ah, taasoo joojin karta qulqulka biyaha haddii aan oggolaansho hore jirin.

## Qodobka 54-aad
## Qodaalka Gudaha Biyo-mareenka

1. Qodista gudaha biya-mareennada iyo harooyinka oo aan ahayn hawlaha dayactirka, taasoo isbeddel ama leexin ku keeni karta qulqulka biyaha ama beddeli karta joogga biyaha dhulka hoostiisa ku jira ama tayada biyaha waa reebban tahay.
2. Marka la qiimaynayo codsiga noocan ah waa in ay ka wada tashadaan Wakaaladda iyo Dawladda Hoose, si loo wada eego faa'iidooyinka qodaalka marka la bar-bardhigo qiimaha bulsheed iyo saamaynta taban ee ay ku yeelan karto biyaha duleed iyo deegaanka.
3. Si loo fuliyo tallaabooyinka farqadaha kore ee qodobkan ku xusan waa in la faro codsadaha mar kasta oo loo baahdo fulinta tallaabooyinka iyo xallinta farsameed ee lagama maarmaanka u ah oggolaanshaha codsigiisa, taasoo looga jeedo ka hortagga iyo yareynta saamayta taban ee imaan karta.

# CUTUBKA 15-aad
# XUQUUQAHA LA XIRIIRA BIYAHA IYO LAHAANSHAHA DHULKA

## Qodobka 55-aad
## Xiriirka Lahaanshaha Dhulka iyo Biyaha

Lahaanshaha gaar ahaaneed ee dhul uu leeyahay qof ama koox xaq uma siinayso lahaanshaha khayraadka biyood ee ku jira korka, hoosta ama la jaarka ah dhulkaas, kamana qaadayso qofkaas ama kooxdaas xaqa ay u leeyihiin isticmaalka biyahaas sida ku cad Xeerkan.

## Qodobka 56-aad
## Ilaalinta Dhulka Aagga Baraha Biyaha iyo Xuquuqda Gelidda

1. Sida uu qabo Xeerkani waxaa la samayn karaa dhul ilaashan hareeraha ama bar-biyood kasta, kaasoo ujeeddadiisu tahay ilaalinta baraha iyo agabka ee loo dhisay soo-saarka, gudbinta iyo keydinta biyaha.
2. Waa in Wasaaraddu diyaarisaa habraac tilmaamaya baaxadda dhulka ilaashan, kaasoo aan ka badnayn baahida ujeeddada cayiman.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

3. Waxaa reebban gelitaanka ama dhex-marka dhulkaas haddii aan fasax jirin, si waafaqsan shuruudaha Xeer-nidaamiyaha.
4. Sarkaal oggolaansho buuxa haysta, horena ogaysiin u siiyey cidda dhulka deggan wuxuu xaq u leeyahay in uu galo goobtaas ama dhulkaas ilaashan ama seeraysan mar kasta oo loo baahdo baaritaan, kormeer ama ilaalinta bar-biyood, si loo sahmiyo khayraad-biyood ama loo cabiro baaxadda biyo-soo-saarka ama astaamaha biyaha si loo fahmo dhulka, dhirta iyo xaaladaha kale ee khuseeya cilmiga biyaha iyo dhulka.

## Qodobka 57-aad
## Magdhawga Dhul Laga Hirgeliyey Agab-biyood

1. Arrimahan soo socda waxay xaq u siinayaan mulkiilaha ama kiraystaha magdhaw haddii dhulkooda laga dhiso agab horumarin biyood oo sababa: -
   b) Qiimo-dhac ku yimaada dhulka oo ay sababtay rakibitaanka agab-biyoodka.
   t) Shakhsi ay soo gaartay waxyeello uu sababay dhismaha agabka biyaha ee dhulkaas.
   j) Cillado iyo burbur dhacay intii ay socotay hawsha hirgelinta biyaha.
   x) Qof ama koox ay ka soo gaartay waxyeello ka dib markii uu waayey dano uu ku haystay dhulkaas lala wareegay.
2. Waxaa loo maraya arrimaha la xiriira la wareegista dhul ama hanti, si looga dhiso adeeg biyood iyo magdhawga ka dhalan kara arrintaas Xeerarka dawladda ee la xiriira arrimahaas.

## CUTUBKA 16-aad
## QODOBO GUUD
## Qodobka 58-aad
## Awoodda Gelitaanka, Baaritaanka iyo Qaadista Muunado

Hawl-wadeen kasta oo haysta isla markaana soo bandhiga oggolaanshaha Wakaaladda wuxuu xaq u yeelanayaa inuu galo dhul kasta isagoo fulinaya arrimaha hoos ku xusan:-

1. Kormeeridda u hoggaansanaanta qodobada Xeerkan iyo wax kasta oo shuruudo ah oo ku xiran oggolaanshaha la bixiyey.
2. Kormeerka iyo u kuur-gelidda xaaladaha la xiriira tayada biyaha dhulka.
3. Ku rakibo, dayactiro, akhriyo ama tijaabiyo qalab kasta oo loo rakibay ujeeddooyinka ilaalinta tayada iyo xaddiga soo saaridda biyaha.
4. Hubinta iyo qoridda walxaha la helay intii lagu jiray qodista ceel-biyoodka.
5. Hubinta xaddiga biyaha laga soo saaray ama ay suurtagal tahay in lagu soo saaro adeegsiga hab kasta.
6. Qaadista muunad kasta oo biyo ah ama dareere ah ama walxo kale oo laga yaabo inay saamayn karaan tayada biyaha.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 59-aad
## Gurmadka Abaaraha Iyo Daadadka

1. Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka ayaa mas'uul ka ah ku dhawaaqista iyo isku dubbaridka arrimaha gurmadka abaaraha iyo daadadka.
2. Wasaaradda oo kaashanaysa dawladaha hoose iyo bahwadaagta caalamiga ah ayaa mas'uul ka ah xiriirinta hawlaha gurmadka biyaha ee lagu gargaarayo dadka ay saamaysay aafada abaaraha iyo daadadku.
3. Wakaaladda oo si dhow ula shaqaynaysa dawladaha hoose iyo Guddiga Gurmadka Abaaraha ayaa mas'uul ka ah qorsheynta iyo hawlaha u qaybinta biyaha dadka iyo duunyada ay abaarta ama daadadku saameeyeen.

## Qodobka 60-aad
## Ilaalinta Deegaanka

1. Waxaa reebban in laga hirgeliyo qodaalka ceel-biyoodyada dhismaha biyo-xireennada waraha, berkadaha dhul-daaqsimeedka iyo dooxooyinka waaweyn ee Puntland.
2. Waxaa waajib ah in la hirgeliyo sahanka saamaynta deegaanka, si loo ilaaliyo waxyeellada deegaanka.

## Qodobka 61-aad
## Magdhaw

1. Wakaalladda Biyaha waxay mag-dhabaysaa hantida lunta ama waxyeello gaarto iyo dhaawaaca shakhsi oo ku yimaada oo ay sababto shaqada si aan ku tala-gal ahayn ay u gaystaan shaqaalaha, taasi waxay ka dulqaadaysaa dadka kor ku xusan qaan-sheegadka iyo magdhawga dadka ku dhaawacma iyo waxyeellada hantiyeed ee loo sheegto, haddii taasi timmaaddo xilliga hawlaha maamulku socdaan marka laga reebo xaalado dayac ku yimid sida ku dhaqan la'aanta shuruucda badbaadada.
2. Shakhsiga ama shirkadda ka gaabisa ku dhaqanka shuruucda badbaadada wuxuu mas'uul ka noqonayaa magdhawga dhaawaca qofeed iyo waxyeellada hantiyeed ee khaladkiisu sababo.
3. Qofka jebiya qodob kasta oo sharciyeed ama maamuleed ee ka mid ah Xeerkan isaga ayaa loo raacayaa magdhawga, kaasoo si habboon loo qiimeeyey waxyeellada uu sababay ficilkiisu iyo dheefaha sharci darrada ah ee uu ka helay.
4. Mulkiiluhu ama wakiilkiisu waa in uu magdhaw ka siiyo dhinac saddexaad khasaare kasta ama waxyeellada uu geysto, si toos ah ama dadban marka uu hirgelinayo hawlaha horumarinta khayraadka biyaha ama uu fulinayo mas'uuliyadihiisa sharciyadeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 62-aad
## Xallinta Khilaafaadka Ka Dhasha Isticmaalka Iyo Maareynta Biyaha

1. Wixii muran iyo khilaaf ah oo ka dhasha hawlaha la xiriira soo-saarista iyo isticmaalka biyaha waxay dhinacyadu marka hore ku xallinayaan hababka garsoor-dhaqameedka ee xallinta khilaafaadka, kuwaasoo ah wada hadalka, dhex-dhexaadinta iyo Sulxiga.
2. Marka la xallinayo khilaafaadka ka dhasha arrimaha soo-saarka iyo isticmaalka biyaha, waxaa mudnaan gaar ah la siinayaa Xeer-dhaqameedka.
3. Haddii ay caddaato in khilaafka lagu xallin waayey hababka ku xusan isla Qodobkan Faqraddiisa 1-aad, waxay dhinacyadu dacwadooda la aadayaan Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 63-aad
## Ciqaabaha

1. Qofkii ku xad-gudba qodob ka mid ah Xeerkan, wareegto iyo amar kasta oo isaga ku wajahan ama is-hortaaga sarkaal ama shakhsi wakiil ka ah, kaasoo fulinaya shaqo uu tilmaamayo Xeerkan, ka dib digniin uu u gudbiyey shakhsigaas sarkaalka qaabilsan, wuxuu mutaysanayaa ciqaab xarig ah ama ganaax.
2. Qofka lagu helo ku xad-gudubka Xeerkan oo mar kale sameeya xad-gudub ka dhan ah Xeerkan, wuxuu mutaysanayaa labo-laab xabsigii iyo ganaaxii hore.
3. Xaddiga ciqaabta xariga iyo ganaaxa ee ku xusan farqadaha 1-aad iyo 2-aad, waxaa jaangoynaysa Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 64-aad
## Ururrada Isticmaalayaasha Biyaha

1. Ururrada iyo asaaska kooxahani waxay noqon karaan reer-guuraa ama reer-magaal, daaqsato, beeraley, wershadley, dabato, ganacsato iyo kuwo ku leh dano maxalliyeed ama kooxo kasta oo u qareemayaal ah oo metelaya codka bulshada isticmaasha biyaha.
2. Dawladda Hoose iyo wakaalladdu waxay aqoonsanayaan kaalinta isticmaalayaasha biyaha, dhiirrigelinayaan fikradahooda, waxaana kaalin waafiya laga siinayaa maamulka khayraadka biyaha.
3. Dawladda Hoose iyadoo la tashanaysa Wasaaradda, Wakaaladda iyo wakiillada isticmaalayaasha biyaha waa inay diyaarisaa habraacyada iyo Xeer-nidaamiyeyaal qeexaya ujeeddada Xeereed ee ururrada isticmaalayaasha biyaha heer degmo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 65-aad
## Fayo-dhawrka Kaabeyaasha Biyaha iyo Bullaacadaha

1. Wakaaladdu iyadoo kaashanaysa dawladaha hoose waxaa waajib ku ah inay xaqiijiso fayo-dhawrka kaabeyaasha biyaha dusha sare iyo kuwa hoose, si loo ilaaliyo caafimaadka guud ee bulshada iyo xoolaha.
2. Degmada oo kaashanaysa Wakaaladda Biyaha ayaa laga doonayaa inay si joogta ah u kormeerto nadaafadda iyo fayo-dhawrka dhammaan kaabeyaasha biyaha, haamaha keydka, booyadaha, berkadaha wadaagga ah ee adeeg-bixiyeyaasha miyi iyo magaalo.
3. Maamullada degmooyinka waa inay u hawl-galaan samaynta qorshe-hawleed lagu hirgalinayo dhismaha kaabeyaasha bullaacadaha ee magaalooyinka, si loo dhawro nadaafadda biyaha dhuumaha maraya.
4. Wasaaraddu waxay istaraatiijiyad iyo Xeer-nidaamiye ku soo saaraysaa halbeegyada lagu ilaalinayo laguna cabirayo fayo-dhawrka kaabeyaasha biyaha iyo bullaacadaha miyiga iyo magaalooyinka.
5. Adeeg-bixiyeyaasha gaarka ah waxaa waajib ku ah xaqiijinta iyo ilaalinta fayo-dhawrka kaabeyaasha biyaha, iyagoo raacaya habraacyada ka degsan.

## Qodobka 66-aad
## Xeer-nidaamiye

Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa wakaalladda waxay soo saari kartaa Xeer-nidaamiyeyaal, habraacyo iyo hagayaal kaabaya fasiraadda, fulinta iyo dhaqan-gelinta Xeerkan.

## Qodobka 67-aad
## Burin

Xeerkani wuxuu burinayaa Xeer kasta oo la xiriiray arrimaha biyaha oo ka hor-imaanaya Qodobada ku xusan Xeerkan.

## Qodobka 68-aad
## Dhaqan-galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR